

Kal Gacal

Ka Gacalku :

- Waa xiriir ka yimaadda niyadda oo isku xira canuga, caruurta , iyo dadka daryeela ba.
- Mujin kalgacal iyo u jabaabid caruurta.

Qoysaska iyo bulshooyinka adduunka waxay kalgacalkoodu u muujiyaan si yaabo kala duwan. Anaguna weynu kala baran karnaa.

Kalgacalku waa muhiim, maxaa yeelay;

- Waxaay caruurta ka caawineysaa in ay noqdaan kuwa wax jecleaan karo, dadkana aamina iyo in ay dareemaan in ay nabagelyo ku suganyihiin.
- Waxay ka caawineysaa caruurta in ay koraan ayna kobcaan.

Waa maxay waxyaalaha aanu sameyn karno?

Caruurta Muluqa (Muujada) ah

- Taabo, dhunko, laabta ku qabo, hadane xambaar maalin kasta canugaaga.
- Soo dhaweyso canugaada marka aad quudineysid.
- Ka fiiri canugaaga idhaha una muusoo (ilka caddey)
- U jimci canugaaga uguna subag gacmo diiran oo xogaa saliid leh.
- Marka uu canugaaga ooyo, kor u soo qaad, taasi waxay canuga ka caawineysaa in uu barto in aad jeceshahay, isla markaasna aad diyaar u tahay marka uu kuu baahdo.
- U hees canugaaga, canugaaga waa u baahanyahay in uu codkaada maqlo mar walba.
- Kula hadal canugaaga cod deggan oo debacsan. Canauga ma fahmi karo kalmadaha aad ku hadleysid balse wuu jecleaan doonaa codkaada.
- Xambaarso canugaaga marka aad waxyaalo qabaneysid. Ilmuhu waa u baahanyihiin in aay aad kuugu dhowyihiin oo jirkiinu is taabanaayo.

Caruurta Yar-Yar

- Sheko u akhri canugaaga. Canugaaga jilbaha saar. Caruurta yar-yar waxay jecelyihiin bugaag kalmado codeysan leh iyo sawiro midabba qurux badan leh.
- Isla ciyaara. Wada qosla.
- Waqti fiican wada qaata. Rux oo heeso macaan u hees canugaaga.
- Hab sii, oo dhunko canugaaga. Caruurta yar yar waxay u baahanyihiin in ay dareemaan jecel iyo nabad gelyo.
- Bar canugaaga kalmado cusub uguna soo cel-celi. Ku dhiira geli canugaaga in uu ka daba dhaho kalmadaha aad ku tiri.
- Heeso hees. Saaro muusikada aad ugu jeceshahay lana ciyaar canugaaga.
- Dhugmo u laahaaw canugaaga. Dhageyso marka uu canugaaga kula hadlaayo.

Maxaad Sameysaa si aad uga dhex dhalisid qoyskaada kalgacal, isaaminaad iyo kalsooni ama badbaado?

2000... May be photocopied with acknowledgement to the Multicultural Perinatal Network
c/o 416-397-4699 Toronto Public Health

Somali translation of "Attachment"

